

# MINNESOTA BARNAAMIJKA AMAAHDA MEHERAD-ABUURKA CUSUB



**B**arnaamijka Minnesota ee Amaahda Meherad-abuurka Cusub (ELP) waxa uu taageeraa kobcinta meheradaha ay leeyihiin dadka tirada yar, dadka dakhliga yar, haweenka, ciidanka hawlgabka ah iyo/ama dadka naafada ah. DEED ayaa lacagaha u dhiibta amaah-bixiyeyaal aan macaash ku shaqeyn, sida lacag ah amaah lagu bilaabo ama lagu sii ballaariyo meheradaha gobolka oo dhan. Yoolalka dheeraadka ee barnaamijka waa in ay shaqooyin ku helaan dadka tirada yar iyo/ama dadka dakhliga yar, in lagu abuurro ama lagu xoojiyo shirkadaha meheradaha ay leeyihiin dadka tirada yar, iyo in kor loogu soo qaado horumarinta dhaqaalaha ee deegaamada dakhligoodu yar yahay.

## XAQU-YEELASHADA IYO SHURUUDAHA

- Xilliga amaahda ee loo diyaariyey meheradaha cusub ama kuwii horay u jiray
- Waxaa khasab ah in ay ugu yaraan 51% leeyihiin oo ay ka shaqeeyaan hal ama laba qof oo ku nool Minnesota oo xaq u leh oo kala ah:
  - Dadka tirada yar
  - Dadka Dakhliga Yar
  - Haweenka
  - Ciidanka Hawlgabay
  - Dadka Naafada ah
- Lacagta ELP waa \$5,000 ilaa \$150,000
- Amaah-bixiyeyaasha ayaa dejiyey shuruudo iyo in uusan macaashku ka badan 4% oo ah cabbirka suuqa macaashka ee Wall Street Journal
- Lacago gaar ah oo le'eg oo ah amaah ama raasumaal ayaa laga raba mashruucyada aan ahayn shirkadaha yaryar ee la bilaabay
- Waxaa jira waxyaabo la isku xadeynayo, sida shuruudo ah intii ay furnaayeen iyo inta ay le'eg yihiin meheradaha tafaariiqleyda ah
- Amaah-bixiyeyaasha qaarkood waxay hayaan maalgelin kale, sida hab ah iibso/sii-iibi

## FAAHFAAHINTA BARNAAMIJKA

- \$6.8 malyan loo dhiibay amaah-bixiyeyaal laga citiraafsan yahay Minnesota oo dhan
- Amaahda oo loo dheellitiro Deegaamada Fog ee Minnesota iyo Labada Magaalo iyo Nawaaxigooda
- \$5.3 malyan oo la amaahiyey 188 amaah-qaateyaal xaq u lahaa ilaa Febraayo 2021
- \$34.2 malyan oo ah lacag dheeraad ku ah dadkii helay amaahda ELP
- Amaah-qaateyaasha oo filaya abuurista shaqooyin cusub oo ka badan 700

## SIDA LOO CODSANAYO

La xiriir hal amaah-bixiye oo la citiraafsan yahay oo aad ka heli karto [mn.gov/deed/business/financing-business/deed-programs/elp](http://mn.gov/deed/business/financing-business/deed-programs/elp)

## MA U BAAHAN TAHAY CAAWIMAAD?.

Farriin noogu soo dir [ELP@state.mn.us](mailto:ELP@state.mn.us) ama Maamulaha Barnaamijka oo ah Drew Lindorfer ayaad kala soo xiriiri kartaa 651-259-7450

ISKAASHI KOR LOOGU SOO QAADAYO MEHERADAHADA DADWEYNAHA KALA DUWAN EE MINNESOTA.

[mn.gov/deed/business/financing-business/deed-programs](http://mn.gov/deed/business/financing-business/deed-programs)